DOWLAD-GOBOLEEDKA KOONFUR-GALBEED EE SOOMAALIYA

Wasaaradda Maaliyadda

SOUTH-WEST STATE OF SOMALIA

Ministry of Finance

TIX: DKGS/XWWM/2018

Date: **8/7/2018**

Miisaaniyadda KGS ee Muddada u dhaxaysa 1da Jannaayo ilaa 31ka Disembar2019

Mudane Wasiir,

Wasaaradda Maaliyadda ee **KGS** waxaa ay idinku wargelineysaa in geeddi-socodka diyaarinta miisaaniyadda sanad-maaliyadeedka dhammaanaya **31ka Disembar 2019.**

Sidaa daraaddeed waxaa dhammaan wasaaradaha laga codsanayaa in ay ogaadaan in miisaaniyaddooda ugu badan ay tahay sida ku qoran **Lifaaqa 1** ee ku lifaaqan wareegtadan iyo in ay soo gudbiyaan qiyaasaha kharashaadka ay u baahan doonaan muddada u dhaxaysa **1da Jannaayo** ilaa **31ka Disembar 2019ka.** Miisaaniyadaha ayaa loo qoondeyn karaa xisaab kasta oo miisaaniyadeed laakiin miisaaniyadda Wasaaraddu waa in aaney ka badan miisaaniyadda ugu badan ee loo qoondeeyey. Kharashaad kale oo intaa ka badan oo la soo jeedinayo waa in gooni loo soo qoraa waana in faahfaahinta loogu qiilsameynayo kharashaadka cusub la bixiyaa, eeg **Foomka 6aad.**

Sida ay tilmaameyso Qaybta 23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha/Dowladda ee soo baxay **2017,** Wasaaradaha ayaa hadda laga doonayaa in Qorshe-sanadeedka Dakhliga iyo Kharashaadka u soo gudbiyaan Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn **30 maalmood** ka hor ka dib marka miisaaniyadda soo-jeedinta ah loo gudbiyo Baarlamaanka. Qorsheyaashani waxaa ay u qoran yihiin qaab bille ah taas oo gacan dad ka siineysa saadaasha/odoroska lacagta kaashka ah ee soo galeysa iyo tan ka baxaysa **KGS** oo sidoo kalena sal u noqoneysa miisaaniyadda loo qoondeynayo Wasaarad iyo Hay'ad kasta. Qorshahani ayaa la soo diri doonaa goor dambe oo ka mid ah muddada miisaaniyad-diyaarinta.

Codsiyada miisaaniyadeed ee la soo gudbiyo waxaa qiimeyn doona Wasaaradda Maaliyadda, oo la tashaneysa Wasaarad kasta, iyada oo lagu xisaabtamayo qiyaasta dakhliga la saadaalinayo in la helo. Codsiga Foomka 6aad iyo wadarta miisaaniyadda la soo jeedinayo.

Wareegtadan Miisaaniyadeed ee halkaan ku lifaaqan waxaa ay macluumaadka ay u baahan tahay ku hageysaa Wasaaradda Maaliyadda. Wareegtada Miisaaniyadda waxaa la socda foomamka loo adeegsanayo soo-gudbinta qiyaasaha miisaaniyadda. Foomamka waa in loo diyaariyaa si waafaqsan tilmaamaha ay bixinayso wareegtadan waana in loo soo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn **31ka Agoosto 2018**.

Maaddaama dakhliga soo gala **KGS** uu xaddidan yahay. Wasaaradaha waxaa laga codsanayaa in marka ay soo gudbinayaan miisaaniyadahooda ay ku soo sheegaan sida ay kharashaadkooda ugu kala muhiimsan yihiin. Go'aanka ugu dambeeya ee la xiriira Miisaaniyadda **KGS** ee **2019ka** waxaa qaadanaya Baaramaanka **KGS.**

Fadlan la soo xiriir Waaxda Miisaaniyadda, Telefoonka **0615581816 /0615575097 /0615028406**, Wasaaradda Maaliyadda haddii aad u baahato gacansiin.

Saaxiibkaa daacadda ah ,Wasiirka W/Maaliyad

Hon. Abdirahman Ibrahim Aden (Sate)

Wareegtada Miisaaniyadda 2019/Dowlad-Goboleedka Koonfur-Galbeed/MOF/5

Diyaarinta miisaaniyadda ee muddada 1 Jannaayo ilaa 31ka Disembar 2018

Wareegtadan Miisaaniyadda waxaa loo qaabeeyay in ay ku caawiso Wasaaradaha iyo Hay'adaha fahamka mas'uuliyadahooda ee ku saabsan diyaarinta qiyaasaha miisaaniyadda.

Wareegtadan waxay uga baahan tahay Wasaarad iyo Hay'ad kasta in ay bixiso macluumaad ku saabsan qiyaasaha kharashaadkooda soo noqnoqda/joogtada ah iyo kuwa hantida raasamaalka ah, faahfaahinta shaqaalaha ee la soo jeediyay, iyo mashaariic horumarin kasta ee la soo jeediyay. Qiyaasaha waa in lagu bixiyo lacagta doolarka mareykanka (USD$)

1. Taariikhaha Geeddi-socodka miisaaniyadda 2018

31ka Agoosto, 2018 – taariikhda kama dambeyska ah ee loo soo gudbinayo qiyaasaha miisaaniyadda Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda

20ka Sibt, 2018 – Mideynta qiyaasaha miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda

10ka Okt, 2018 – La-tashiga Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha

15ka Okt, 2018– Miisaaniyadda oo qabyo-qoraal ah ayaa loo soo bandhigay Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirada

31ka Okt, 2018 – Miisaaniyadda La Soo Jeediyay ayaa loo gudbiyay Baarlamaanka

Marka la gaaro 30ka Nof, 2018 – Wasaaradaha iyo Hay'adaha waa in ay u gudbiyaan Qorshayaashooda Dakhliga iyo Kharash-gareynta Sannadlaha Wasaaradda Maaliyadda (Loo soo saarey si waafaqsan Tilmaan gaar ah)

31ka Dis, 2018– Miisaaniyadda La Ansaxiyay.

Qiyaashaha waxaa la soo gudbin karaa iyagoo nuqul barnaamij ah (fayl Excel) ama nuqul adag ah balse waa in ay noqdaan qaabka (format-ka) Wareegtadan Miisaaniyadda.

Haddii wasaaradda/hay'adda ku guuldareysato in ay ku soo gudbiso qiyaasta miisaaniyadooda wakhtiga kama dambeyska ah gudahiisa, waaxda miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda waxay xor u tahay in ay diyaariso qiyaasta miisaaniyadda iyadoo ka wakiil ah Wasaaradda la sheegay oo lagu saleynayo xadka aan la dhaafi karin ee lagu gaarsiiyay Wasaaradda/Hay'adda wareegtada miisaaniyaddan.

2. Dokumeentiyada Miisaaniyadda la soo gudbinayo

Dokumeentiyada miisaaniyadda ee ay u soo gudbinayaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Waaxda Miisaaniyadda, ee Wasaaradda Maaliyadda waa:

Foomka 1aad – Dakhliga Wasaaradda ee la qiyaasay - **Lifaaqa 2aad**

Foomka 2aad – Kharashaad joogtada/soo noqnoqda ee la qiyaasay – **Lifaaqa 3aad**

Foomka 3aad – Qiyaasaha shaqaalaha. Faahfaahinnada shaqaalaha hadda jooga wasaaradda iyo kuwa la soo jeedinayo oo loo kala saarey jago iyo heer ahaan. – **Lifaaqa 4aad**

Foomka 4aad – Shuruudaha kharashaadka raasamaalka ee la qiyaasay – **Lifaaqa 5aad**

Foomka 5aad – Kharashaadka Mashruuca Horumarinta ee La Soo Jeediyay. Faahfaahinta mashaariicda waaweyn ee gaarka ah ee Wasaaradaadu ay aqoonsatay. DHAMMAAN maaliyadaha deeq-bixiyaha ee la helay iyadoo loo marayo xisaabta TSA iyo cid 3aad ee Wasaarad ahaan waa in lagu daro – **Lifaaqa 6aad**

Foomka 6aad – Codsiyada Kharash-gareynta Cusub. Bixi faahfaahinnada kharash-gareynta cusub ee la soo jeediyay, adigoo bixinaya faahfaahinnada sababta miisaaniyad dheeraad ah loogu baahan yahay – **Lifaaqa 7aad**

Qorshaha Dakhliga & Kharash-gareynta Sannadlaha ah ayaa loo baahan yahay in la dhammeystiro 30 maalmood gudahooda ee miisaaniyadda la soo jeediyay ee loo gudbiyay Baarlamaanka. Foomkan waxaa la diri doonaa marka ay taariikhdu tahay **10ka Nof 2018** si ay u soo dhammeystiraan Wasaarad kasta iyo Hay'adda Kharash-gareynta si ay u geliyaan saadaalintooda bilaha ah.

3. Tilmaamaha Loogu Talogalay Diyaarinta Soo-jeedinta Miisaaniyadda ee Sannad Maaliyadeedka 2018

Wasaaradaha waxay ku diyaarin karaan soo-jeedimada miisaaniyadooda foomam nuqul adag ah ama nuqul barnaamij (Excel) ah ka-dibna waxay u soo gudbinayaan Wasaaradda Maaliyadda. Wasaaradda Maaliyadda waxay gelin doontaa macluumaadkan Qaybta Diyaarinta Miisaaniyadda.

Haddii Wasaaradaha ay doonayaan in ay dhammeystiraan foomamkooda oo nuqul barnaamij ah (*soft copy*) Wasaaradda Maaliyadda waxay bixin doontaa faylal *excel* ah oo loogu talogalay foom kasta. Xaashiyada waxaa lagu heli karaa luuqadaha Af-Soomaali iyo Ingiriis. Macluumaadka waxaa keliya la gelin karaa godadka (*cells*) midabka jaallaha. Natiijooyinka xisaabaadka waxaa lagu muujin doonaa godadka (*cells*) midabka cawlan.

Foomka 1aad–Qiyaasaha Dakhliga Joogtada ah (Soo noqnoqda) – Lifaaqa 2aad

Dhammaan dakhliyada iyo lacagaha ay ururisay ama heshay Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed waa in lagu oggaado qiyaasaha miisaaniyadda tus, Lacagaha laga helo canshuuraha, Canshuuraha kastamka iyo ujuurooyinka dowladda. Marka la diyaarinayo qiyaasaha miisaaniyadda dakhliga Wasaaradaha waxay dib u hubiyaan dhammaan ilaha ka soo xarooda dakhliga ee ay Wasaaradu hadda maamusho ama soo-jeedinayso in ay maamusho sannadka miisaaniyadda in lagu darey. Qiyaasahan waxaa bixin doona Waaxda Dakhliga ayadoo kala tashanaysa wakaalad kasta ee ururinaysa.

Haddii la filayo in dakhliga uu koror ku yimaado iyadoo sabab u ah in la kordhiyay qiimaha lagu soo dalaco, ama haddii meelaha laga qaado la kordhiyo, ama haddii Wasaaradu ay doonayso in ay bilowdo qaadidda dakhli muddada miisaaniyadda, faahfaahinnada dhammeystiran ee ah nooca dakhliga la ururiyay iyo taariikhda la bilaabay ururinta ayaa ah in lagu daro. Iyadoo la raacayo Qaybta 12 (1) (c) ee Xeerka PFM oo ah dokumeenti sharci oo muujinaya isbeddel(o) kasta ee lagu sameeyo qorsheyaasha siyaasadda dakhliga canshuurta iyo kan aan canshuurta ahayn, waa in la soo bandhigo kama dambeys taariikhda loo soo gudbiyo qiyaasaha miisaaniyadda Baarlamaanka.

Haddii faahfaahinta sheyga xisaabta dakhliga aan lagu soo darin barnaamijka diyaarsan ee miisaaniyadda sharaxaadda dhammeystiran ee isha dakhliga ka soo xaroonaya waa in la bixiyo sidaa awgeed sumadda sheyga dakhliga ku habboon ayaa la qoondeyn karaa

Ilaha dakhliga ee Wasaaradaha laga yaabo in ay mas'uul ka yihiin waxaa ka mid ah:

- Cashuuraha isticmaalka alaabo ama ruqsadda isticmaalka alaabto.
- Deeqo laga helayo hay'ado/ururro caalami ah ama hay'ado kale
- Dakhli ijaar ku yimid
- Ujuurooyin maamul
- Ganaaxyada

Si aad u dhammeystirto Foomka 1aad

- Geli magaca Wasaradda
- Geli sumadda loo qoondeeyay Wasaaradda. Sumadaha Wasaarad kasta waxaa lagu sheegay **Lifaaqa 1aad**.
- Dhammaan ilaha ka soo xarooda dakhliga ee ay Wasaaradu ama Wakaaladu hadda maamusho ama soo jeedinayso in ay maamusho muddada miisaaniyadda ee sannad maaliyadeedka (FY) 2018 waa in lagu muujiyo Foomka 1aad iyadoo lala eegayo qaybta ku habboon. Haddii sheyga dakhliga aan lagu qorin liiska ku qoran foomka, u geli faahfaahinta sida 'kuwo kale' waxaadna faahfaahinnada siisaa Wasaaradda Maaliyadda.

- Sheyga dakhli kasta geli qadarka la filayo in la ururiyo/qaado inta lagu guda jirro muddada 1da Jannaayo – 31 Diseembar 2018.

Foomka 2aad –Qiyaasaha Kharashaadka Joogtada ah (Hawlgallada) – Lifaaqa 3aad

Kharashaadka joogtada ah (soo noqnoqda) waa kharashka loo baahan yahay si ay u hawlgasho Wasaaradda oo ay u fuliso hawlaheeda maalinlaha, si ku saleysan in uusan jirin isbeddel ku yimaada doorka ama shaqada laga bilaabo sannad ilaa sannad. Qiyaasaha sannadlaha ah waxaa loo baahan yahay in ay noqdaan kuwo macquul ah oo ka turjumaya kharashka dhabta ah ee ku baxa socodsiinta hawlaha Wasaaradda iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo ujeeddooyinka Wasaaradda ee sannad miisaaniyadeedka. Kharashaadka waa in uusan dhaafsiisanayn gudaha xadka aan la dhaafi karin ayadoo la tixraacayo **Lifaaqa 1aad**. Qadarada waxaa loo qoondeyn karaa gudaha sumado kasta ee xisaabta miisaaniyadda. Kharash-gareyn kastoo cusub ee la filayo waa in lagu faahfaahiyo **Foomka 6aad.**

Haddii qiyaasaha miisaaniyadda loo soo gudbiyo kharashaadka hanti raasamaal ah, kharashka joogtada ah ee lagu suurtagalinayo qalabeynta hantidan waa in lagu daro miisaaniyadda. Tusaale ahaan, soo iibsashada qalabka daabacaadda waxay u baahan doontaa miisaaniyad lagu soo iibinayo waraaqaha iyo khadka daabacaada, soo iibsashada gawaari waxay u baahan doontaa miisaaniyadda kharashaadka shidaal.

Kharashaadka joogtada ah (soo noqnoqda) waa kharashaadka loo baahan yahay si ay u hawlgasho Wasaaradda oo ay u fuliso hawlaheeda maalinlaha. Kharashka joogtada ah waxaa ka mid ah:

- Lacag-bixinnada ujuurooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha iyo ujuurada kale ee shaqaalaha
- Kharashaadka hawlaha, tusaale ahaan kharashaadka khadamaadka/adeegyada, socdaalka, ama agabka iyo sahayda.

Kharashaadka ujuurooyinka iyo mushaaraadka

Qiyaasta miisaaniyadda Ujuurooyinka iyo Mushaaraadka ee shaqaalaha rayidka ah iyo shaqaalaha kale ee lagu maalgeliyo Dakhliyada dowladda ee loogu talogalay in lagu daro **Foomka 2aad** waxaa lagu xisaabin doonaa **Foomka 3aad,** oo lagu saleeyay jagooyinka shaqo ee la qorey sannadahii la soo dhaafey. Jagooyinka lagu maalgeliyo miisaaniyadda mashruuca RCRF II ee uu oggolaaday Bangiga Adduunka waxaa la gelin doonaa Foomka 5aad (Kharashaadka Mashruuca Horumarinta). Eeg tilmaamaha hoos ku xusan ee loogu talogalay buuxinta **Foomka 3aad**.

Kharashaadka kale ee hawlaha

Foomka 2aad wuxuu taxayaa liiska waxyaabaha kharashaadka ee laga yaabo in loo baahan yahay si loo qabto shaqooyinka Wasaaradda. Fadlan bixi qiyaasaha qadar kasta ee laga yaabo in aad ugu baahan doonto qaybahan laba iyo tobanka bilood laga bilaabo 1da Jannaayo ilaa 31 Disembar, 2018.

Si aad u dhammeystiro Foomka 2aad:

- Geli magaca Wasaradda
- Geli sumadda loo qoondeeyay Wasaaradda. Sumadaha Wasaarad kasta waxaa lagu sheegay **Lifaaqa 1aad**
- Geli qadarada la xisaabiyay Foomka 3aad (eeg hoos) ee loogu talogalay Ujuurooyinka iyo Mushaaaraadka qayb kasta ee shaqaalaha lagu taxay liiska foomka.

- Geli qadarada la filayo in loo baahdo 2018ka ee kharashaadka lagu taxay liiska Foom A. Keliya qaar ka mid ah kharashaadka ayaa loo baahan doonaa. Kuwo kale waa in laga tago iyagoo bannaan.
- Geli saalaadinta qadarada loogu baahan yahay lacagahan inta lagu guda jirro Sannad Maaliyadedka 2018.

Fomka 3aad Qiyaasaha shaqaalaha – Lifaaqa 4aad

Si loo go'aamiyo miisaaniyadda ujuurooyinka iyo mushaaraadka ee **Foomka 2aad**, faahfaahinnada jagooyinka shaqaalaha ayaa loo baahan yahay in marka hore lagu dhammeystiro/buuxiyo **Foomka 3aad**. Macluumaadka ku saabsan lacag-bixinnada mushahaarka iyo gunnooyinka la siiyo Wasiirada iyo Saraakiisha kale ee dowladdu magacowdo waa in sidoo kale looga warbixiyo foomkan.

Kharashka guud ee mushaaraadka ee dhammaan jagooyinka lagu qoray liiskooda Foomka 3aad waa in lagu tusmeeyaa miisaaniyadda mushaaraadka iyo ujuurooyinka ee Foomka 2aad iyo Foomka 5aad ee loogu talogalay jagooyinka uu maaliyadda siiyo mashruuca RCRF II**.** Faahfaahinnada iyo miisaaniyadda shaqaalaha maaliyadda uu siiyo mashruuca RCRF II waxaa bixin doona Qaybta EAFS oo ku saleysan miisaaniyadda uu ansaxiyay / loo gudbiyay Bangiga Adduunka.

Si aad u dhammeystirto **Foomka 3aad**:

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli sumadda loo qoondeeyay Wasaaradda. Sumadaha Wasaarad kasta waxaa lagu sheegay **Lifaaqa 1aad.**

Qaybta 1aad ee foomkan, ku qor liiska shaqaale kasta ee la magacaabey ama la filayo in uu magacaabo Guddiga Shaqalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed ka hor 31ka Diseembar 2018. Shaqaalahan waxay yeelan doonaan lambarka iyo darajada jagada shaqaalaha rayidka ah, waxaana la siin doonaa mushaaraad ku saleysan nisbada mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ee la ansaxiyay. Keliya jagooyinka uu ansaxiyay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, ama loo soo jeediyay magacaabidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, waa in lagu daro qaybtan. Haddii uusan jirin boos ku filan in lagu qoro/daro dhammaan jagooyinka shaqaalaha rayidka ah ee la soo jeediyay ku soo lifaaq liis ay ku qoran yihiin faahfaahinta loo baahan yahay (ama ku dar jiif-u-taxyo xaashida Excel-ka).

Loogu talogalay Shaqaale kastoo ah Shaqaalaha Rayidka (Dowladda):

- Geli lambarka jagada uu u goondeeyay Guddiga Shaqaalaha Rayidka
- Geli Magaca Jagada ee uu ansaxiyay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Haddii jagada uu hadda qof hayo, geli magaca qofka loo magacaabay jagada. Haddii jagada aan weli la hayn, ka tag meesha iyadoo bannaan.
- Geli darajada uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah uu u qoondeeyay jagada
- Geli tallaabada mushaarka ee ku habboon qofka haya jagada. (sannadka 2018 dhammaan shaqaalaha waxay noqon doonaan tallaabada1aad ee darajadooda.)
- Geli mushahaarka derajada iyo tallaabada iyadoo la raacayo wareegtada Mushaarka Shaqaalaha Rayidka ah (mar haddii tani ay ansaxiyeen Golaha Wasiirada)
- Geli tirada bilaha sida buuxda u shaqeyn doono shaqaalaha inta lagu guda jirro muddada u dhaxeysa Jannaayo – Disembar 2018. (Tirada bilaha ee ugu badan waxay noqon doonaan 12 bilood)
- Shaqaalaha rayidka ah joog-u-taxa tirada wuxuu noqon doonaa 1. Wadarta mushaaraadka ee qof kasta ee 2018 waa la xisaabin doonaa.
- Ka-dibna geli tirada bilaha qofka la filayo in uu shaqeeyo inta lagu guda jirro sannad maaliyadeedka 2018. Tirada bilaha la geliyay waa in ay ka turjumaan taariikhda

suurtagalka ah in shaqaalaha la soo jeediyay uu bilaabi doono shaqada, ilaa ugu badnaan 12.

Qaybta 2aad ee foomka ku qor faahfaahinnada qaybaha kale ee shaqaalaha iyo lacag-bixinnada kale ee mushaarka oo ay ka mid yihiin:

- Shaqaale qandaraas ku jooga
- Shaqaale ujuuro ku shaqeeya
- Shaqaale wakhti gaaban shaqeeya (oo aan weli magacaabin Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah)
- Hawlwadeennada adeegyada amniga (boolis, mileteri, ciidanka xabsiyada)
- Mushaaraadka Wasiirrada iyo Saraakiisha Dowladdu Magacowdo

Haddii foomku uusan ki filneyn ku soo lifaaq liis ku qoran faahfaahinnada, ama ku dar layman ama xariiqo xaashida (*spreadsheet*).

Qayb kasta oo ka mid ah shaqaalaha, jago kasta,

- Bixi magaca jagada
- Haddii ay jirto hal jago oo jagadana la buuxiyo bixi magaca shaqaalaha.
- Geli mushaarka loo bixin doono jagada
- Geli tirada bilaha ee jadaga mushaarkeeda la bixin doono sannadka 2018 (Tirada ugu badan ee bilaha waa 12)
- Haddii ay jiraan in ka badan hal qof oo haya jagadan bixi tirada dadka ka shaqeeya.
    - Tusaale ahaan, haddii ay jiraan 10 qofood oo ilaalada amniga ah oo hadda ah shaqaale ujuuro ku shaqeeya oo qaata mushaar isku mid ah geli faahfaahinnada shaqaalaha qaybta 211103 Shaqaalaha Ujuurada Ku Shaqeeya iyo tirada oo 10 ah.
- Ka-dibna geli tirada bilaha qofka la filayo in uu shaqeeyo inta lagu guda jirro sannad maaliyadeedka 2018. Tirada bilaha la geliyay waa in ay ka turjumaan taariikhda suurtagalka ah in shaqaalaha la soo jeediyay uu bilaabi doono shaqada, ilaa ugu badnaan 12.

Foomka 4aad – Kharashaadka Hantida – Lifaaqa 5aad

Qorshaynta hawlaha iyo mudnaanaha Wasaaradaada muddada miisaaniyadda waxay gacan ka geysan doontaa go'aaminta kharashaadka hantida ee loo baahan yahay. Marka la gudbinayo qiyaasaha miisaaniyadda ee kharashaadka hantida raasamaalka ah lacag kastoo la soo jeediyay in lagu kharash-gareeyo soo gadashada hantida raasalaamka ah, sida qalabka, alaabada xafiiska waxaa loo baahan yahay in lagu daro qiyaasaha kharashaadka hantida raasamaalka ee **Foomka 4aad**. Hase-yeeshee, haddii soo iibsashada hantida lagu daro miisaaniyadda horumarinta (**Foomka 5aad**) waa in <u>*aan*</u> lagu darin hoosta qiyaasaha kharashaadka hantida raasamaalka ee **Foomka 4aad**.

Kharashaadka Hantida Raasamaalka ah waa kharashka ku baxa soo iibsashada hantida sida kombiyuutarada, qalabka daabacadaha, alaabta xafiisyada iyo gawaarida.

"Hanti Raasamaal ah" waxaa loola jeedaa hanti dhab ah ama la taaban karo:

- Qiimaheedu ka badan yahay ama le'eg yahay qiimaha ugu yar ee hantida ka dhigaya raasamaal, sida lagu sheegey Qaybta 1.4 ee Xeer-nidaamiyahan; Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabakahayaa dhammaan hantida leh qiimo gaaraya $200 ama ka badan
- Uu gacanta ku hayo ama leeyahay Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed, oo
- Qiyaasta muddada la isticmaali karo ay ka badan tahay hal sano oo laga bilaabo markii la soo iibsadey oo uu gacan soo galey.

Ogow: marka laga hadlayo miisaaniyadda iyo hadafyada ka-warbixinta, Hanti Raasamaal ah waxaa ay la micne tahay Hantida Ma-guurtada ah ee uu tilmaamayo Buugga Istaatistikada Maaliyadeed ee Dowladda ee loo yaqaano *Government Financial Statistics Manual* 2014 waxaanna miisaaniyadooda loo dejiyay oo loo diiwaangeliyay si waafaqsan sumadda Shaxda Xisaabta GFS ee Hantida Ma-guurtada ah ee 311xxx (ka *eeg Xeer-nidaamiyaha #2 Xeer-nidaamiye Abuuraya Qaab-dhismeedka Baadi-sooca Miisaaniyadda ee Miisaaniyad-Diyaarinta & Miisaaniyad-Fulinta* wixii munaaqasho ah ee ku saabsan sumadaha Shaxda Xisaabta). Dhammaan hantidaas waa in lagu diiwaangeliyo Diiwaanka Hantida Raasamaalka ee dhexe.

Hantida Raasamaalka ah ee qiimaheedu ka yar yahay $200 laguma diiwaangelinayo Diiwaanka dhexe ee Hantida Raasamaalka ah waxaana lagu dari doonaa miisaaniyadda ka-dibna waxaa loo kharash-gareyn doonaa sida Isticmaalka Alaabo iyo Adeegyo, oo waafaqsan sumada Shaxda Xisaabta GFS ee 22xxxx (ka *eeg Xeer-nidaamiyaha #2 Xeer-nidaamiye Abuuraya Qaab-dhismeedka Baadi-sooca Miisaaniyadda ee Miisaaniyad-Diyaarinta & Miisaaniyad-Fulinta* wixii munaaqasho ah ee ku saabsan sumadaha Shaxda Xisaabta iyo sidoo kale ka eeg munaaqasho dheeraad ah Wareegtada Miisaaniyadda Sannadlaha ah, Qeybta 3aad, Foomka 4aad).

Faahfaahinnada hantida la soo jeediyay in la soo iibsado sannadka 2018 waa in lagu qoro **Foomka 4aad** si ay u tixgeliyaan Golaha Wasiirada.

Si aad u dhammeystirto **Foomka 4aad**:

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli sumadda loo qoondeeyay Wasaaradda. Sumadaha Wasaarad kasta waxaa lagu sheegay **Lifaaqa 1aad**.
- Haddii Wasaaradda ay soo-jeedinayso iibsiga hanti raasamaal ah, faahfaahinnada waa in lagu bixiyo qayb kasta hoosteeda. Geli sharaxaadda sheyga, qiimaha ku kacaya sheyga ee la qiyaasey, iyo inta shey ee la soo iibin doono.

Iibsashada hantida raasamaalka ah waxaa loo baahan yahay in la caddeeyo iyadoo la bixinayo faahfaahinno dhammeystiran oo ku saabsan sababta loogu darayo kharashaadka hantida raasamaalka ah soo-gudbinta miisaaniyadda

Foomka 5aad – Soo-jeedimada Mashruuc Horumarin – Lifaaqa 6aad

Mashaariicda Horumarinta waxaa loola jeedaa hawsha maalgelinta raasamaalka ee leh muddo cayiman oo marka la dhammeystiro, waxay ku darsamayaan hantida muuqata ama awoodda dowladda. Waxaa ka mid noqon kara lacagaha loo adeegsado in lagu soo iibiyo ama lagu hagaajiyo hantida raasamaalka ah sida dhismeyaasha iyo qalabka waaweyn. Mashaariicda horumarinta badankooda waxaa maalgeliya deeq-bixiyeyaal balse waa in ay ansaxiso ka-dibna ay isku dubarido dowladda. Mashaariicda horumarinta waxaa sidoo kale ka mid noqon kara mashaariicda joogtada ah, sida dayactirka dhisme, maalgelinta taageerada kharashaadka joogtada ah (RCRFII)

Mashaariicda horumarinta ee RCRF II, qadarka miisaaniyada ku jira **Foomka 5aad** waxaa laga helaa **Foomka 3aad**, qiyaasaha shaqaalaha.

Kharashaadka joogtada ah ee aan mushaarka ahayn ee mashruuca RCRFII waa in lagu daro oo lagu saleeyo maaliyad-siinta loo ansaxiyay sida uu ku taliyay Bangiga Adduunka.

Si mashaariicdan ay u noqdaan dhaqaale ahaan kuwo suurtagal ah oo fudud in wakhtigooda la hirgeliyo, waxaa lagu nuuxnuuxsadey in mashaariicdan si habboon loo qorsheeyo. Faahfaahinnada mashruuca horumarinta ee la xiriira ujeeddooyinka mashruuca, natiijooyinka ka dhasha, wakhtiga iyo sababaha mashruuca waxaa loo baahan yahay in lala soo gudbiyo qiyaasaha miisaaniyadda si loogu saamaxo Golaha Wasiirada in ay go'aan ka gaaraan mudnaanta guud ee mashruuc kasta ee loo soo gudbiyay in la eego oo la tixgeliyo. Waxaa intaa

dheer, in kol hore si habboon loo qorsheeyo mashruuca in ay sidoo kale muhiim u tahay hirgelinta mashruuca in lagu guuleysto waxayna saamaxaysaa la socoshada horumarka mashruuca inta lagu guda jirro muddada mashruuca. Marka la eego nooca mashaariicda horumarinta waxaa habboonaan karta in Wasaaradaha ay ka raadsadaan kaalmo dibadeed deeq-bixiyeyaasha ama NGO-yada marka la sameynayo soo-jeedinta, gaar ahaan qaybta kharashaadka.

Mashaariicda horumarinta waxaa u maalgelin kara deeq-bixiyeyaasha sida tabarrucaad 'Cid 3aad ay bixiso' ahaan. Tani waxaa loola jeedaa in deeq-bixiyaha uusan si toos ah maaliyad u siinayn mashruuca maaliyadana ma soo marto xisaabta waaxda Khasnadda Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed. *DHAMMAAN* mashaariicda ay maaliyadda siiyaan deeq-bixiyeyaasha waxaa loo baahan yahay in lagu diiwaangeliyo Foomka 5aad iyo in lagu darro miisaaniyadda la soo gudbinayo. Haddii Wasaarad ay doonayso in ay soo-jeediso Mashruuc Horumarin oo ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaasha, ama hore u heshay deeq-bixiye doonaya in uu maalgeliyo Mashruuc Horumarin, faahfaahinnada waa in lagu bixiyo Foomka 5aad. Foom gaar ah waa in loo diyaariyo mashruuc kasta.

Foomka 5aad ee miisaaniyadda diyaarsan waa in uu bixiyo faahfaahin ku filan si loo taageero mashruuca waa in ay ku jiraan:

1) **Ujeeddooyin:** Sheeg ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee mashruuca iyo waxa mashruuca uu qaban doono iyo cidda ka faa'iidi doonto mashruuca. Ilaa inta suurtagalka ah, ujeeddooyinka waa in si cad loo qeexo si loo suurtageliyo in la dejiyo bartilmaameedyada oo lala eego waxqabadka la cabbiri karo. (Tusaale, ujeeddo gaar ah oo lagu hagaajinayo waddooyinka ay isticmaalaan bulshada beeraleyda ah waa in lagu qiimeeyo nisbada/heerka kor-u-kaca wax-soo-saarka iyo dakhliga u soo xareedo bulshadaasi gaarka ah ee waddada la hagaajiyay tageysa). Sharaxaad ka bixi haddii ay suurtagal tahay qiyaas faa'iidooyinka dhaqaale, bulsho, maamul ama faa'iidooyinka kale ee suurtagalka ah in laga helo mashruuca. Si cad oo qeexan u sheeg u-qaadashada ku hoos qarsan qiyaasaha wax-soo-saarka mashruuca. Faa'iidooyinka ma caddeyn karaan kharashka?

2) **Waxqabadyada:** Si cad oo qeexan u sharax waxqabadyada mashruuca iyo sida uu ku gaarayo ujeeddooyinka la cayimay. Haddii ay ka jiraan tiro waxqabadyo hoosaad gaar ah (tusaale, dhismo, tababarka fidinta beeraha iwm.) mashruuca gudahiisa, sharax mid kasta waxaadna muujisaa sida ay iskula xiriiraan. Sharaxaadda waa in ay qeexdo inta uu le'eg yahay, goobta laga fulinayo, gashiga loo baahan yahay, marxaladeynta iyo natiijooyinka laga filayo.

3) **Muddada:** Sheeg taariikhda la bilaabayo iyo taariikhda la dhammeynayo. Waa muhiim in la hubiyo in ay suurtagal tahay maamul iyo farsamo ahaanba in la bilaabo oo lagu dhammeeyo mashruuca muddada wakhtiga ee la soo jeediyay. Muddada mashruuca waa in ay noqoto mid macquul ah oo la gaari karo waana in ay saamaxdo hoos-u-dhacyo kasta ee lagu sameeyo dib-u-dhacyada wakhtiga ee sababta u ah duruufaha aan la fileyn**.**

4) **Halka laga fulinayo:** Muuji gobolka ama degaanka gaarka ah ee mashruuca laga hirgelin doona iyo halka faa'iidooyinka laga dareemi doono.

5) **Qorshaha iyo Waqtiga Hirgelinta**: Muuji waqtiga iyo abaabulka loogu talogalay hirgelinta waxqabadyada kala duwan ee mashruuca. Xaqiiji in Wasaaraddu ay karti u leedahay hirgelinta mashruuca, ama kaalmada dibadda ee loo baahan karo. Soo koob natiijooyinka ka soo baxa daraasadeyn suurtagal ah kasta ee la sameeyay. Bixi dhacdooyinka ugu waaweyn (taariikhaha la filayo in la bilaabo iyo in la dhammeeyo,

bartilmaameedyada iwm.) ee hirgelinta waxqabadyada kala duwan. Sharax sida mashruuca uu ula xiriiro mashaariicda kale ee la soo-jeediyay ama socda. Ku dar, meel kastoo suurtagal ah, faallooyinka ka yimid Wasaaradaha ama Wakaaladaha kale ee ku lugta leh waxqabadyadan la xiriira. Ku dar sharaxaadda kooban ee habraacyada loogu talogalay korjoogteynta hirgelinta mashruuca.

Wadarta Kharashaadka: Ku dar keliya kharashadka sida tooska ah ula xiriira in si wax-ku-ool ah loo qabto waxqabadyada iyo soo-saaridda ujeeddooyinka lagu dejiyay soo-jeedinta. Kharashadka kale ee la xiriira waa in laga maalgeliyo ilo kale. Miisaaniyadda waa in ay noqoto mid macquul ah. Soo ogow waxa waxqabadyada qorsheysan ay dhab ahaan ku kacayaan, oo ha u-qaadan in aad awoodi doontid in aad intaas in ka yar ku qaban doontid. Miisaaniyadda waa in ay ka mid noqdaan dhammaan kharashaadka la xiriira maareynta iyo maamulka mashruuca.

Lambar Mashruuc oo loogu talogalay mashruuc kasta ayaa waxaa u qoondeyn doona Wasaaradda Maaliyadda.

Si aad u dhammeystirto Foomka 5aad:

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli Magaca Mashruuca. Magaca waa in uu si cad u qeexo mashruuca.
- Calaamadee sanduuqa si aad u tilmaanto haddii mashruuca uu yahay mid Cusub ama Socda. Sannadka 2018 mashaariicda oo dhan waxay noqon doonaan kuwo cusub (oo la soo jeediyay).
- Calaamadee sanduuqa si aad u tilmaanto haddii mashruuca uu yahay in la maalgeliyo iyadoo loo marayo miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed ama tabarrucaadda deeq-bixiye ‘Cid 3aad bixinaysa’. (Sannadka 2018 keliya mashaariicda la xaqiijiyay in ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaal ayaa la tixgelin doonaa.)
- Haddii deeq-bixiyuhu uu bixinayo maalgelinta geli faahfaahinta haddii maaliyadda la soo dhigayo, xisaabta TSA ama xisaab bangi oo ka duwan.
- Haddii deeq-bixiyaha loo cayimo mashruuca magaca deeq-bixiyaha waa in la sheego (tusaale, Sanduuqa Somalia Stability Fund)
- Ku qor macluumaadka ku saabsan ujeeddooyinka mashruuca Qaybta 1aad
- Ku qor sharaxaadda waxqabadyada mashruuca Qaybta 2aad
- Ku qor taariikhaha la filayo in la bilaabo iyo in la dhammeeyo Qaybta 3aad
- Ku muuji halka ugu muhiimsan ee ka faa’iideysa mashruuca Qaybta 4aad.
- Ku sharax qorshaha iyo waqtiga hirgelinta ee la soo jeediyay Qaybta 5aad.
- Qaybta 5aad ku qor kala-dhigdhigista kharashaadka mashruuca ee loo taxay si waafaqsan qaybta kharashaadka iyo sumadda la xiriirta. Sumadda qayb kharashaad kasta waxaa laga heli karaa Shaxda Xisaabaadka.
    - Tusaale ahaan, mashruuca lagu dhisayo dhismaha xafiisyo wuxuu muujin doonaa kharashka shaqada dhismaha iyadoo la isticmaalayo sumadda 311121 ee Dhismayaasha Aan Degaanka Ahayn.
    - Kharashka la qiyaasay ee mashruuca waa in ay ka mid noqdaan kharashka la xiriira qalabka raasamaalka ah sida alaabada xafiiska.
- Qaybta 5aad waa in ay sidoo kale muujiso qadarka maaliyadaha uu bixin doono deeq-bixiyaha si loogu bixiyo kharashka mashruuca.

Foomka 6aad – Codsiyada Cusub ee Kharash-gareynta – Lifaaqa 7aad

Maadaama soo-gudbinta miisaaniyadda bilowga ah ay tahay in lagu diyaariyo gudaha xadka aan la dhaafi karin ee miisaaniyadda oo ku saleysan kharash-gareynta sannad ka horreeyay, Wasaaradaha qaarkood waxaa ay filan doonaan kharash-gareyn cusub oo waafaqsan waxqabadyadooda iyo ujeeddooyinkooda oo kordha.

Si loo dhammeystiro Foomka 6aad:

- Geli magaca Wasaaradda
- Sharaxaadda kharashaadka
- Sumadda miisaaniyadda
- Qadarka kharashaadka miisaaniyadda ee sannadka
- Darajaynta Mudnaanta. 1 – 5. 1 oo ah mudnaanta koowaad. Tani waxay u saamaxaysaa Waaxda Miisaaniyadda in ay darajeyso dhammaan codsiyada iyadoo ogsoon in maaliyadaha dowladda ay xaddidan yihiin.
- Faahfaahinnada – sabab u yeelidda codsiga kharash-gareynta cusub

Shaqaalaha:

- Jagada – jagada cusub. Tani waa in uu ansaxiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Darajada: darajada jagada
- Qadarka kharashaadka miisaaniyadda ee sannadka
- Darajaynta Mudnaanta. 1 – 5. 1 oo ah mudnaanta koowaad. Tani waxay u saamaxaysaa Waaxda Miisaaniyadda in ay darajeyso dhammaan codsiyada iyadoo ogsoon in maaliyadaha dowladda ay xaddidan yihiin.
- Faahfaahinnada – sabab u yeelidda codsiga kharash-gareynta cusub

Macluumaad dheeri ah:

- Faahfaahin dhammeystiran oo lagu taageerayo codsiga kharash-gareynta cusub. Sida miisaaniyadda lagu gaarey, oo ah tirada bilaha shaqaalaha miisaaniyadooda la dejiyay. Haddii la bixiyo macluumaad badan waxay gacan ka geysanayaan taageerada codsiga
- Sabab/caddeyn lagu taageeri karo codsiga kharash-gareynta cusub. Tani waa in ay la xiriirto ujeedooyinka iyo mudnaanaha Wasaaradda

Lifaaqa 1aad: Miisaaniyadda Aan La Dhaafi Karin ee Wasaaradda

Sumadda	Wasaaradda	Miisaaniyadda Aan La Dhaafi Karin 2019
01	Wasaarada Madxtoyada	$1,143,916
02	Wasaarada Cadaalada iyo Garsoorka	$68,316
03	Wasaarada Maaliyada	$1,389,680
04	Wasarada Arimaha Gudaha	$691,316
05	Wasaarada Beeraha iyo Waraabka	$58,680
06	Wasaarada Amniga Gudaha	$1,439,337
08	Wasaarada Batroolka	$43,020
09	Wasaarada Dakadaha	$43,020
10	Wasaarada Qorsheynta	$80,905
11	Wasaarada Caafimaadka	$142,976
12	Wasaarada Waxbarashada	$441,340
14	Wasaarada Warfaafinta	$175,956
15	Wasaarada Boostada	$43,020
16	Wasaarada Dhalinyarada iyo isborttiga	$130,680
17	Wasaarada Biyaha	$58,680
18	Wasaarada Ganacsiga	$58,044
20	Wasaarada Dastuurka	$52,656
21	Wasaarada Maareynta Musiiboyinka	$58,680
23	Wasaarada Bi,ada	$50,085
24	Wasaarada Diinta	$43,020
25	Wasaarada Shaqada Shaqaalaha	$61,656
26	Wasaarada Haweenka	$58,680
27	Wasaarada Gaadiidka	$67,680
28	Wasaarada Xanaanada Xoolaha	$49,044
29	Wasaarada Kaluumeysiga	$43,020
30	Wasaarada Howlaha Guud iyo Guryeenta	$58,680
31	Gudiga Shaqaalaha Rayidka	$109,791
32	Baarlamaanka	$1,919,520
33	Xafiiska Hanti dhowrka	$80,990

34	Xafiiska Xisaabiyaha	$16,050
	Wadarta Guud	$ 8,678,438

Lifaaqa 2aad: Foomka 1aad

Lifaaqa 3aad: Foomka 2aad

Lifaaqa 4aad: Foomka 3aad

Lifaaqa 5aad: Foomka 4aad

Lifaaqa 6aad: Foomka 5aad

Lifaaqa 7aad: Foomka 6aad